



READ

– WADA AKHRISKA FASALKA 2

WAXAAD MUHIIM U TAHAY WAALID AHAAN

Waalid ahaan, waxaad ka ciyaartaa qayb muhiim ah kobcinta ilmahaaga akhriskiisa iyo xirfadaha qoraalka. Akhriska iyo qoraalku waa u muhiim koboca gaarka ah ee ilmahaaga iyo sida uu ilmahaagu wax ugu barto gudaha dugsiga iyo nolosha mustaqbalka.

Iyaddoon loo eegin sida ilmahaagu wax u akhriyo, walaadin ahaan waxaad ka caawin kartaa in ilmahaagu ku wanaagsanaado akhriska. Waxaad ku taageeri kartaa akhriska ilmahaaga addoo la akhriya ilmahaaga ilaa 15-20 daqiiqo maalintii kasta. Ilmahaagu waxa uu ku wanaagsanaadaa akhriska wax badan marka uu adiga si sare kuugu akhriyo.

Isla markaana, sidoo kale waxaad ku taageeraa akhriska ilmahaaga addoo sii wada inaad kor ugu akhriso ilmahaaga buuggaagta aanu ilmahaagu laftiisu akhriyi karin.

AKHRI OO KALA HADAL ILMAHAAGA

Wada akhriska iyo ka hadalka waxaad akhriyayso waxay caawisaa inay kobciso luqadda ilmahaaga iyo xirfadaha akhriska.

Kala hadalka ilmahaaga wax ku saabsan buuga KA HOR, MUDDADA LAGU JIRO iyo KA DIB akhriska uu yahay fikrad wanaagsan. Tilmaamaha “ Sida wax loola akhriyo Ilmahaaga”, waxaad ka heli kartaa fikrado gaar ah oo ku saabsan sida aad uga hadli karto buuggaagta.

Waxaad ka hadli kartaa wax ku saabsan sawirada, kelmada, ha, tasmada ama wax kasta oo kale oo niyada ku soo dhaca markaad akhriyayso.

Aqoonta wayn ee ilmahaagu uu leeyahay waxyaabaha ku saabsan iyo kelmaddaha badan ee ilmahaagu yaqaano ee isticmaalo, sida wanaagsan ee ilmahaaga ay ugu suuragasho inuu noqon doono akhriye wanaagsan. Ilmahaagu waxa uu u baahanyahay kelmaddo badan si uu u fahmo tasmadda buuggaagta iyo inuu awood u yeesho inuu naftiisa qoraal ku muujiyo.

Markaad waydiiso su'aalo furan oo waydiimo ah, ilmahaagu waxa uu si aad u firfircoon uga qayb galaa wada sheekaysiga ku saabsan buugga. Samaynta tana, luqadda ilmaha iyo rabitaanka loo sheegaa way kacdaa: Haddii aad ku hadasho luqad kale oo aan Danish ahayn, waxaad sidoo kale isticmaali karta markaad ka hadasho wax ku saabsan buugga. Ka hadal waxa ku saabsan kelmaddaha iyo weedhaha labbadaba Danish iyo luqadda uu ilmahaagu u dhashay. Sidoo kale waxaad ku akhriyi kartaa luqaddaada hooyo



TAAGEER AKHRISKA KELMADAHAA EE ILMAHAAGA

Marka ilmahaagu wax kuu akhriyo, waxaa jira kelmado badan oo ilmahaagu laftiisu aanu akhriyi karin.

Aasaas ahaan, waa in aanad sixin ilmahaaga haddii uu khalad u akhriyo iyaddoo saamaynta ku yeelata fahanka waxa la akhriyayo mooyee.

Waxaad ku taageeri kartaa ilmahaaga addoo u oggolaanaya inuu isku dayo in kelmaddaha uu laftiisu akhriyo oo ku ammaan dedaal samaynta. Shayga ugu muhiimsan waa in ilmahaagu ku celceliyo oo uu ku faraxsanyahay inuu akhriyo. Haddii qoraalku aad u adag yahay, waxaad ugu akhriyi kartaa si kore ilmahaaga.

Waxaad ka heli doontaa caawimada akhriska ilmahae xaashida “Sida loo taageero akhriska koowaad ee madaxa banaan”.

WAKHTIGA IYO RABITAANKA AKHRISKA

Waa muhiim in ilmahaagu u feker si wanaagsan si uu wax u akhriyo. Wakhtiga lagu qaatay akhriska waa inuu noqdaa wakhti raaxo leh oo u dhexeeya adiga iyo ilmahaaga. Ahmiyada sii wakhtiga oo iska ilaali dhibista ama faragelinta marka aad akhriyayso.

Markaad dhiirigeliso ilmahaaga oo aad xiiso umuujiso akhriska ilmahaaga, ilmahaagu guud ahaan waxa uu dooni doonaa inuu wax badan akhriyo.

Haddii, ka sakow, aad ogaato in aanu ilmahaagu doonayni-nuu wax akhriyo, waxaad kaartaa:

- inaad hesho buuggaag ku saabsan waxa uu ilmahaagu xiiseeyo
- ka feker haddii buugu aad u adagyahay. ilmahaagu waa inuu awood u yeeshaa inuu akhriyo badan kelmaddaha laftiisu.
- akhri buug isku mid ah dhowr wakhti markaas akhrisku wax badan ayuu socda
- ugu akhri tuduc kasta si kore ilmahaaga
- soo gaabi wakhtiga lagu qaatay akhriska
- ka feker haddii wakhtiga maalintu uu ku habboonyahay iyo haddii aad ka akhri lahayd meel kale.

Haddii aad ogaato inay ilmahaaga dhibaato ka haysato akhriska ama ay ka luntay rabitaanka gebi ahaan wax loo akhriyo, waa inaad waydiiso dugsiga ama la xidhiidho La talinta Cilmi nafsiga ee Barbaarinta wixii ah latalinta magaca la qarinayo ee la taliyaasha akhriska telefoonka: 8940 3777

WAX LA QOR ILMAHAAGA

Ilmahaagu waxa uu ku wanaagsanaan doonaa qoraalka marka uu akhriyayo. Dhanka kale, ilmahaagu sidoo kale waxa uu ku wanaagsanaadaa akhriska marka uu qoro. Gudaha buuga “Daq...

(Kayga...), ilmahu waxa uu la xidhiidhin karaa, awiraa oo wada jir adiga kuula qoraa sheeko gaaban. Tusaale ahaan “Bakaylahayga” ama “Safarkayga xaga...” Ha saxin khaladka higaada ilmahaaga, laakiin qir ilmahaaga iskudayda inuuq oro.